

Macluumaaad ku socda macaamiisha oo khuseeya hawlgal cunto

Cilmi baare Elinn Leo Sandberg oo ka socota jaamacadda Lund ayaa kuurgal indho-indhayn ah <ku samaynaya ka qayb qaatayaasha dukaanka dhexdiisa. Arrimahaasi waxay u dhacayaan inay qayb ka noqdaan ururinta aqoonta mashruuca ee cilmi baarista "Cunto qaybinta ururada diimaha".

U kuurgalkaas ama indho-indhayntaasi waxay dukaanka ka dhacaysaa 12/12 markay saacadu tahay 11-14 iyo 20/12 markay saacadu tahay 12-15. Taariikh badan ayaa iman doona wakhtiga guga 2023, waxaanu taariikhahaas ku sheegi doonaa Facebook iyo dukaanka dhexdiisa. Markaa joogitaanka aad dukaanka joogto taariikhahaa iyo saacadahaa la cayimay, waxaad oggolaatay inaad ka qayb qaadato mashruuca cilmi baarista ah. Halkan hoose waxaad ka heli doontaa macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca iyo macnaha ay ka qayb qaadashadu. Inaad ka qayb qaadato waa mid ikhtiyaari ah, waxaanad dooran kartaa inaad wax ka gadato dukaanka wakhti kale ama maalin kale haddii aadan rabin in lagu arko waxaadna dooran kartaa inaad joojiso ka qayb qaadashada wakhti kasta adiga oo ka baxaya dukaanka.



Cilmi baare Elinn Leo Sandberg

Sidee ayey daraasadu u shaqaysaa?

Daraasadda cilmi baarista waxaa ku jira qaybinta cuntada ee Stadsmisionernas iyo kaniisadda Iswiidhan (Svenska kyrkan). Xafiiska hawlgalca cuntada ee Malmö oo u kuurgalaya ama indhaha ku haya iyo waraysiyo gaar ah lala yeesho macaamiisha oggolaada arrintaas. Mashruuca cilmi baaristu waxa uu rabaa inuu ogaado sida uu u shaqanayo marka wax laga gadanayo xafiiska hawlgalca cuntada (Matmissionen)

U kuurgalka ama indho ku haynta waxaa lagu diiwaangelinaya qoraallo laga samaynayo goobta. Ma jirayaan cod ama muuqal la duubaya. Macluumaaadka la qorayo dhammaantood waa wada qarsoodi, magacaaga ama macluumaaadka kale ee shakhsii ahaaneed lama diiwaangelin doono.

Macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca cilmi baarista, ku soo dhawow inaad la soo xiriirto cilmi baarayaasha ama la xir

Mas'uulka cilmi baaraha Anna Angelin, anna.angelin@soch.lu.se, 0709 15 07 63

Haysta shahaadada sare ee PHD-ga Elinn Leo Sandberg, elinn.leo_sandberg@soch.lu.se, 0735 35 17 56

Jaamacadda cilmiga bulshada Lunds Universitet, Box 23, 221 00 Lund, Sweden